

*Sidan 1/Bogga 1:*

## **MACLUUMAADKU KU SOCDA QOFKA GUURAYA:**

*Macluumaad iyo talooyin ku socda qofka degan guri kiro ah*

*Sidan 2/Bogga 2*

Fadlan la xidhiidh shirkadaada guryaha haddii ay jirto wax aad isweydiinayo.

*Sidan 3/Bogga 3*

### **Waxyaalaha muhiimka ah ee u baahan in laga fikiro**

Marka aad guureyso ayay jiraan waxyaalo u baahan in la hubiyo. Ugu horeyn waa inaad dhiibto heshiiskaagii guriga. Laakiin ogow waa inaad sii bixiso kirada xiliga aad guriga celisay. Waa inaad sidoo kale joojiso heshiiskaagii korontada guriga oo aad cinwaankaaga bedesho.

### **Guriga qoraal ahaan u dhiib.**

Waa inaad markasta heshiiskaaga kireysiga u dhiibto qoraal ahaan. Kadib marka aad dhiibto heshiiskaaga gurigaaga waa inaad sii bixiso lacagta guriga muddo xili go'an ah. Xiligaas waxa loo yaqaan xiliga iska dhiibista. Xiliga iska dhiibistaadu waxa uu ku qoran yahay heshiiska guriga. Haddii aad tusaale ahaan aad dhiibto guriga taariikhda 24 abriil ayaa heshiisku dhamaanayaa 31 luulyo waana inaad kirada bixiso ilaa xiligaas. Haddii aad leedahay geerash ama boos baarkinka waa inaad marmarka qaar kaas gooni u shiibtaa.

### **Soo celi dhamaan furayaasha**

Dhamaan furayaasha waa in la soo celiyo marka aad guureyso. Taasi waxa ay khuseysaa xataa tusaale ahaan khanka, guriga qasaalada iyo ka gaadhiga kuleyliya. Haddii aan dhamaan furayaasha la soo celin ayaad bixin doontaa kharasha ay ku kacdo in la bedelo qulfulka guriga.

Furayaasha waa in ugu danbeyn la soo celiyaa saacada. 12.00 maalmaha shaqada ee ugu horeya ee kadib marka uu heshiiska kireysigu dhamaado.

### **Soo sheeg cinwaanka cusub**

Marka aad guureyso waa inaad cinwaankaaga cusub u sheegto Skatteverket– waa bilaash taasi. Miyaad doonaysaa in bostadu xili cayim toos laguugu soo wareejiyo cinwaankaaga cusub (dib lagaaga soo daba diro) ayaanay waxba ku kharash gareyneyn. Waxa aad guuritaanka iyo in waraaqaha lagaa soo daba diro ka sameyn kartaa bogga internetka ee Svensk adressändring; [www.adressandring.se](http://www.adressandring.se).

Si boostaadu marka aad guurto kadib toos kuugu timaado cinwaankaaga cusub ayaad ugu baahan tahay inaad sameyso soo wargelinta cinwaanka ugu yaraan shan maalmood ka hor inta aanad guurin.

Intaa waxa dheer inaad adigu wargaliso ururada, shirkadaha caymiska, bangiga, shirkadaha krorontada, joornaalka, asxaabta iyo dadka aad raqaano iwm inaad bedeshay cinwaanka.

### **Korontada, telefoonka iyo internetka.**

Marka aad guureyso waa inaad saxaexdo heshiiska korontada cinwaanka cusub, dhinac ahaan jooji xejiskaagii cinwaanka hore. Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh shirkada telefoonka.

Haddii aad haysato telefoon aad macmiilato oo gurigaaga waa inaad sidoo kale u sheegto inaad guureyso. Xasuusnow inaad joojiso dhamaan ama wareejiyo internetka aad macmiilato haddi aad leedahay taas. Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh shirkada internetka.

*Sidan 4/Bogga 4*

**Kormeerka iyo nadiifinta kama dambaysta ah**

Ka hor inta aanad guurin ayaa kireeyaha gurigu uu kormeerayaa guriga. Waa inaad xataa u diyaar garowdaa in gurigaaga la tuso kireystayaasha mustaqbalka. Ugu danbeyn waa xiligii la sameyn lahaa nadiifinta kama danbeynta ah.

**Gurigaaga waa la kormeerayaa ka hor inta aanad guurin**

Waxa wanaagsan inaad joogto marka uu kireeyaha gurigu kormeeeraayo gurigaaga. Marka kormeerku dhamaado ayaa lagu siin doonaa warbixinta kormeerka.

Laakiin ka fikir tan kormeerka ka hor:

- Dhamaan qalabka uu gurigu leeyahay sida tusaale ahaan albaabada gudaha, birta dharka la sudho iyo saxanka qubeysigu waa inay ku yaalaan guriga. Haddii lagu siiyay buuga tilmaamaha isticmaalka ama daryeelka aaladaha guriga waa inaad kireystaha kale ugaga tagto guriga.
- Looxa dhulka la dhigo iyo dhulka meelaha qoyan (musqulaha, jikada, musqusha) waa in aan lagu qarin roogaga.

*Wixii dhaawacyo ah ama waxa xoog u duugoobey ee guriga ayaa lagaa qaadi karaa kharashkooda.*

**Gurigaaga tus**

Marka aad gurigaaga dhiibto waa inaad sida wafaqsan xeerka kireysiga u diyaar garowdo in guriga la tuso dadka loo soo bandhigo inay u soo guuraan guriga. Caadi ahaan ayaa kireeyaha guriga kula soo xidhiidhi doonaa adiga si aad iskula qaadataan wakhti ku haboon.

**Masaxaada guuritaanka oo gurigoo dhan ah**

Guriga waa in si taxadir leh loo masaxo ka hor inta aanad dhiibin furayasha. Haddii uu gurigu aanu si ku filnen loo masaxin ayaa kadib bixin doontaa kharashka lagu masaxaayo. Waa inaad tusaale ahaan sifeeyso dhamaan daaqadaha, masaxdo shoolada gadaasheeda, masaxdo foornada iyo marxawada shoolada, barafka ka saarto talaagada oo aad nadiifiso dhulka. Raac tilmaamaha oo liistada warbixinta ee ku qoran buugan yar.

**Marka aad guureyso waa inaad dhamaan alaabtaada wada qaadata**

Marka aad guureyso waa inaad dhamaan alaabtaada wada qaadata, xataa waxyaalah aad ku keydinayso khanka, gershka iyo balakoonka iyo meelaha banaanka. Haddii aad wax tuureyso ama cid siineyso ayay adiga masuuliyadaada tahay inaad hubiso in waxaas laga qaaday marka aad ka guureyso.

**Sida u masax inta aanad ka guurin**

Halkan waxa la socda tilmaamaha masaxaada guurida ee madbakha, musqusha iyo meelaha kale ee guriga. Halka danbe waxa ku yaala liistada warbixinta ee fiican in la raaco si aanad waxba uga tagin.

*Sidan 5/Bogga 5*

**Xasuunow marka aad masaxaada guuritaanka ee musqusha aad sameynayso**

1. Shoolada soo jiid adigoo dhinacyaga qabanaaya. Nadiifi dhinacyada iyo xagga danbe iyo gidaara, dhinacyada khaanadaha iyo dhulka.
2. Nadiifi nooc ay doonaanha daaweyaashu ha ahaadeene.
3. Nadiifi marxawada (ama hawo qaadaha) xagiisa hoose iyo xagiisa sareba. Ka soo saar filterka oo nadiifi.
4. Nadiifi moofada guud ahaan iyo birhaba. Waxa wanaagsan in la isticmaalo saabuun.

5. Barafka ka saar talaagada iyo qeybta barafka. Sidoo kale nadiifi oo hawada u dhig.
6. Dhaq khaanadaha madbakha kor iyo hoosba. Ha iloobin albaabada xagooda sare.

*Sidan 6/Bogga 6*

**Xasuunow marka aad masaxaada guuritaanka ee musqusha sameynayso**

1. Biyo ku dhaqdhaq bulaacada dhulka. Haddi uu leeyahay qeybta hore ka saar saxanka qubeysiga marka aad masaxeyso hoostiisa.
2. Sidoo kale nadiifi saxanka faraxalka xagiisa hoose.
3. Ha iloobin kursiga musqusha xagiisa bananka iyo gacanta.

*Sidan 7/Bogga 7*

**Xasuunow marka aad masaxaada guuritaanka ee qolka sameynayso**

1. Rooga/qadiifada dhulka wada qarisa ee aad adigu dhigtey waa in laga qaadaa. Sidoo kale ka qaad xabagta rooga.
2. Nadiifi hiiterka iyo xagiisa danbe.
3. Meelaha rinjiga la mariyey sida looxa daaqada iyo qoriga gidaarka dhulka ku wareegsan waa in la nadiifiyaa.
4. Muraayadaha ka masax dhinac kasta, xataa meelaha dhexdooda. Looxa daaqada waa in sidoo kale la nadiifiyaa.
5. Ka qalaji kabadhka saladhiisa iyo khaanadaha.
6. Nadiifi dhamaan albaabada. Xasuusnow xagga sare!

*Sidan 8/Bogga 8*

**Fiiri liistada warbixinta masaxaada guuritaanka**

**Madbakha**

- Gidaarada
- Girgirka daaqadaha
- Muraayada daaqada
- Miiska daaqada
- Hiiterka
- Meelaha hawada
- Nalalka
- Fiishada
- Marxawada shoolada
- Shoolada gudaheeda
- Shoolada dusheeda (xataa dhinaca danbe)
- Khaanadaha madbakha, gude iyo dibadba
- Khaanadaha xawaashka
- Talaagada dhinca, qeybta wax qaboojinta iyo qeyta barafka
- Gacmaga albaabada
- Albaabada
- Looxa miiska
- Meesha weelka lagu xalo
- Looxa dhinaca dhulka ku wareegsan
- Dhulka
- Saqafka

**Barkada dabaasha iyo qobeyska**

- Saqafka
- Gidaarada
- Nalalka
- Kabadhka musqusha
- Meelaha hawada
- Muraayada
- Saxanka qubeysiga (xataa hoostiisa iyo gadaashiisa)
- Kursiga musqusha
- Saxanka faraxalka
- Gacmaga albaabada
- Albaab
- Godka dhulka
- Dhulka
- Saxanka qubeysiga xagiisa hoostiisa iyo gadaashiisa
- Haddii uu yaalo kabadhka, gude iyo dibadba
- Haddii uu jiro miiska wax dhaqista
- Haddii uu jiro mishiinka dharka
- Haddii uu jiro qalajisada

**Qolka**

- Girgirka daaqadaha
- Muraayada daaqada
- Miiska daaqada
- Hiiterka
- Fiishada
- Kabadhka dharka iyo armaajada gude iyo dibadba
- Gacmaga albaabada
- Albaabada
- Looqa dhinaca dhulka ku wareegsan
- Dhulka
- Looxa albaabka hoostiisa

**Meelaha kale:**

- Balakoonka
- Meelaha banaanka
- Khanka
- Geerashka

*Marka aad guureyso waa inaad dhamaan alaabtaada ka wada qaadato, xataa waxyaalah aad ku keydinayso khanka, geershka iyo balakoonka iyo meelaha banaanka.*